




(imageless edition)

- ✎ Winny Asara
- 🔒 Magriet Brink
- 📁 Abdi Muse
- 😊 Somali
- 📖 Level 3



Digaag iyo hangaarac



Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)


Digaag iyo hangaarac

Written by: Winny Asara


Illustrated by: Magriet Brink

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.





This work is licensed under a Creative Commons Attribution 3.0 International License. <https://creativecommons.org/licenses/by/3.0>




Digaag iyo Dixiri waxay ahaayeen saaxiibo. Laakiin had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo tartamo. Hal maalin waxay go'aansadeen inay ciyaaraan kubadda cagta si ay u arkaan midka ah ciyaaryahanka ugu fiican.

Waxay aadeen garoonka kubada cagta  
waxayna bilaabeen ciyaartooda.  
Digaagadu waxay ahayd mid dhakhso  
badan, laakiin hangaaraca ayaan kasii  
dhakhso badnaa. Digaagadu waxay u  
darbeystay meel fog laakiin hangararici!  
ayaa u darbeystay meel kasii fog.  
Digaagadu waxay bilaawday inay  
dareento xanaaq.







Waxay go'aansadeen in ay ciyaaraan gool ku laad. Waxaa goolhaye ku hormaray hangaraarici. Digaagtii waxay dhalisay hal gool oo kaliya. Kadibna waxay ahayd digaaggada markeedi in ay difaacdo goolka.




Laga soo bilaabo wakhtigaas, digaagga iyo hangaraacyaasha waxay is ku ahaayeen cadow.




Hangaraarici wuu darbeyay kubadii waa uu na dhaliyay. Hangaraarici ayaa soo ceyriyay kubada wuuna dhaliyay. Hangaraaraci ayaa madaxa ku soo tuuray kubada wuuna dhaliyay. Hangaraarici waxa uu dhaliyay shan goal.




Digaagadii waa ay qufacday ilaa ay qufacday Hangraarici ku jiray caloosheeda. Hooyadii hangaraaraca iyo ilmaheedi waxay ku gurguurteen geed korkiisa si ay iskugu qariyaan.




Digaaggadu waxay ka cadhootay in ay guuldareysatay. Waxay ahayd kuuldareyste aad u xun. Hangaraarac waxuu bilaabay in uu qoslo sababtoo ah saaxiibkiisa ayaa ahaa mid sidaas u buuqa.




Digaaggadu waa aay daacsatay. Kadibna way liqday oo candhuuf tuftay. Kadibna way hindhistay oo qufacday. Oo qufacday. Hangaraaricii waxuu ahaa karaahiyo!




Digaagadii aad ayay u kanaaqday oo  
waxay aad ukala qaaday afkeedi! waxayna  
liqday hangararic!.



Hooyadi! Hangararaca ayaa ku qaylisyay,  
"Isticmaal awooddaada khaaska ah  
cunugeyga!" Hangarararacyaasha waxay  
samayn karaan shiir xun iyo dhadhan  
daran. Digaagadii waxay bilaawday in ay  
dareento xanuun.



Iyadoo digaaggadi u soo socotay guriga, waxay la kulantay hangaraarac hooyadii. Hangaraarac hooyadii baa waydiisay, “Ma aragtay ilmahaygi?” Digaagada waxbo maysan odhan. Hooyadii Hangaraaraca ayaa walwashay.



Kadibna Hooyadii Hangaraaraca waxay maqashay cod aad u yar. “Hooyo i caawi!” ayuu ku dhawaaqay codka. Hooyadii Hangaraarac waxay fiirisay agagaarka oo dhageysatay si taxaddar leh. Codka ayaa ka yimid digaaggada dhexdeeda.